



**Xafiiska Qarammada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda
Soomaaliya (UNPOS)**

WAR-SAXAAFADEED 021/2009

**ERGAYGA GAARKA AH EE QARAMADDA MIDDOWAY OO
RAJEEYAY IN AY DEGANAANSHO KU SOO NOQON DOONTO
MAGAALADA MOGADISHU**

Nayroobi, 13 July 2009 - Ergayga gaarka ah ee Qaramadda Middoway u qaabilsan Arrimaha Soomaaliya Ahmedou Ould-Abdallah ayaa rajo ka muujiyey in guulihii ay gaareen Ciidamada Amaanka Soomaaliyeed Isbuucan Inay u ogolaan doonto in xooggaa Nabadgelyo ah ku soo noqoto Magaalada Mogadishu, dadka ku nool Mogadishuna ay ku noolaadaan nolol caadi.

Ergayga gaarka wuxuu yiri weerarada lagu soo qaaday dhowaan ciidamada dawlada Soomaaliyeed iyo kuwo kaleba ayaa sababay dad badan oo deganaa Magaalada Mogadishu inay si xoog leh u barakacaan kuwaas oo ay ku jiraan dad dhowaan Mogadishu ku soo noqday oo rajaynayey inay si nabadgelyo leh ugu noolaadaan meesha. Wuxuu rajeeeyey in dhacdooyinkii dhacay Isbuucani u ogolaan doonaan dad badan inay dib ugu noqdaan guryahooda isla markaana saamaxaan in kaalmo dhinaca Beni'aadamka ah la gaarsiiyo dadka sida aadka ah ugu baahan “ Inkastoo ciidamada Soomaaliyeed iyo kuwo kaleba ay turid ka muuqatay haddana weerar joogto ah ayaa ku socday dhismooyinka dawlada iyo dadka rayidka ahba taasoo ay la socotay xad gudub xoog leh oo xuquuqul insaanka ah iyo dilidba. Iyagoo ka jawaab bixinayaa arintan ayaa Ciidamada Dawlada oo ayan jirin wado kale oo u furan inay difaacan dadka Magaalada Mogadishu ku nool mooyee” ayuu yiri Ergayga. “Waxyeeleynta Umaada Soomaaliyeed oo ay waxyeelayaan dad Soomaali ah maahan mid cudurdaar loo helaayo”.